



Fariintani waxaa iyada oo ah English, Русский, Soomaali, Español, 简体中文, TiếngViệt la soo geliyay <https://go.usa.gov/xtBQC>.

Janaayo 24, 2022

Ku socota: Dadka iyo qoysaska shaqaaleysiya Shaqaalaha Taageerada Shakhsiyeed (PSW-yada)

Ka socota: Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka (ODDS)

Ujeedada: Is xasuusinta tababarka looga baahan yahay PSW

Waxaa jira tababar ay PSW-yada aad shaqaaleysiiso ay tahay in ay qaataan. Tababarku waa mid sharci ahaan la iskaga baahan yahay. Wakhtiga loo qabtay waa **Maarso 31-keeda, 2022**.

Fadlan xasuusi PSW-yadaadu in ay qaataan tababarka. Haddii aysan sidaasi sameyn, ma awoodi doonaan in ay kuu shaqeeyaan waqtiga loo qabtay ka dib. ODDS waxay sidoo kale PSW-yada u dirtay is xasuusin.

Wixii macluumaad dheeraad ah ee:

- Fiiri dokumentiyada ku lifaaqan.
- Su'aalaha Inta Badan La Iska weydiiyo oo ku saabsan tababarka la iskaga baahan yahay ayaa la helayaa iyaga oo ku qoran [English](#), [Farta Waaweyn ee Ingiriisiga](#), [Arabic](#), [Af-Ruushka](#), [Simplified Chinese](#), [Farta Waaweyn ee Simplified Chinese](#), [Soomaali](#), [Isbaanish](#) iyo [Vietnamese](#)
- Dokumentiyo iyo [warbaahinta dhanka maqalka](#) oo ku saabsan tababarka ayaa laga helayaa internet-ka <https://go.usa.gov/xtBmG>.

Kala xiriir maamulahaaga kiiska wixii su'aalo ah. Haddi loo baahdo, wuxuu kaa caawin karaa in aad hesho PSW cusub. Waxaad sidoo kale Guddiga Daryeelka Guriga ee Oregon ka waci karta 1-877-867-0077 si aad taageero u hesho. Doorro kala doorashada Barnaamijka Isku xirka Ilaha Cida Loo Shaqeeyo

Si Daacadnimo leh,

Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka

Nagala soco Facebook @oregonDHS.IDD ama twitter @OregonODDS oo wax ka ogow website-keena.

Waxaad heli kartaa dokumentigan oo ku qoran luqaddo kale, far waaweyn, farta dadka indhaha aan qabin wax ku akhriyaan ee braille ama qaabka aad doorbidayso. Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka ee Oregon kala xiriir 503-945-5811. Waan aqbalnaa wicitaanada nooc kasta leh ee adeegyada gudbinta farriimaha ee loogu talagalay Dadka dhagaha la, dhagaha la'-indhaha la', maqalku ku adag yahay ama qaba naafanimada dhanka hadalka. Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan bixiyayaasha adeegyada gudbinta farriimaha booqo www.oregonrelay.com ama www.fcc.gov/encyclopedia/trs-providers.